



| | |
|---|------------|
| BARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA | |
| XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GELID / RECEIVED | |
| TAR: | 16/09/2015 |
| TIX: | 740 |
| SIXIX: | Kadun |

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

September. 15, 2015

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka

Ujeedo: Talo soo jeedin

Mudane Guddoomiye,

Annagoo ah Xildhibaannada magacyadooda hoos ku qoran yihiin waxaan soo jeedinaynaa talooyin ku saabsan dhammaystirka hiigsiga 2016-ka, sidaa darteed waxaan Mudane Guddoomiye kaa codsanaynaa in Ajandaha aad ku dardid soo jeedinteena Maalinta Arbacada.

Magacyada Xildhibaannada:

1. Xil. Nuur Faarax Jaamac Nuuri Jaar
2. Xil. Sheikh Aadan Maxamed Nuur (Madoobe) Sh. Aadan
3. Xil. Fawziya Maxamedn Sheikh Fawziya
4. Xil. Cismaan Xaaji Cali Sh. Habiille
5. Xil. Saalim Caliyow Ibrow Saalim
6. Xil. Xabiibo Maxamed Khayr Xabiibo
7. Xil. Daahir Xaaji Geelle Daahir X. Geelle
8. Xil. Mahdi Cali Cusmaan Mahdi Cali Cusmaan
9. Xil. Cali Adan Xuseen Cali Adan
10. Xil. Maxamed Cabdullaahi Kaamil Kaamil
11. Xil. Abdiraadiir Sh. Xamadi Abdiraadiir Sh. Xamadi

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka

Muqdisho=

September 14, 2015

Ujeedo: Talo soo jeedin ku saabsan hiigsiga 2016ka

Mudane Guddoomiye,

Annagoo ah Xildhibaanno ka tirsan BFS oo isu xil saaray inay ka talo bixiyaan jihaynta hiigsiga 2016ka, kulamo dhowr ah oo aan ku falanqaynay xaaladda siyaasadéed, Amniga iyo qaadashada go'aannada masiiriga in ay yihiin mas'uuliyad wadareed ay si buuxda u wada leeyihiin hay'adaha dastuuriga ah ee dalka, waxaana lagu gaarayaa wadatashi guud oo mar walba lagu xeerinaayo maslaxadda guud ee Qaranka.

Maadaama Golaha Shacabka uu yahay hay'adda ugu sarreysa oo leh awoodda sharci dejinta, ansixinta go'aannada masiiriga ah ee taabanaya Qaranimada, ilaalinta siyaadada (Sovereignty) iyo midnimada Dalka, Golayaasha Dastuuriga ah ee Dowladda waxaa waajib ku ah inay dhowraan haybadda dowladnimo iyo madaxbanaanida Qaranka, waana inay u maraan go'aannada taabanaya masiirka iyo aayaha dowladnimo si waafaqsan Dastuurka sida KMG ah loo ansixiyey iyo Shuruucda kale ee dalka.

Sida ku cad qodobada 1^{aad} iyo 4^{aad} ee Dastuurka sida KMG ah loo ansixiyey oo ka hadlaya madax bannaanida iyo Sarreynta Sharciga, hadaba marxaladda kala guurka ah waxaa loo marayaa nidaam waafaqsan Dastuurka, iyo shuruucda kale ee dalka. Arrimaha muhiimka u ah geeddi socodka hiigsiga 2016ka oo weli qabyada ah si loo gaaro doorasho HAL QOF IYO HAL COD waxa ka mid ah:

- Dhammaystirka dib u eegista Dastuurka si loogu qaado afti dadweyne
- Diyaarinta iyo Ansixinta Sharciga Doorashooyinka
- Diyaarinta iyo Ansixinta Sharciga Axzaabta

- d. Dhismaha Maxkamadda dastuuriga iyo Guddiga Adeegga garsoorka
- e. Dhammaystirka Sugidda Amniga Dalka

Mudane Guddoomiye,

Annagoo tixraacayna Qaraarradii Baarlamaanka ee ku taariikhaysnaa 23/07/2015ka lana ansixiyey 27/07/2015ka kuna saabsanaa hannaanka kala guurka ee 2016ka iyo Qorshaha lagu dhisayo Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka noqonaya Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo baahida loo qabo in Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya doorkiisa ka qaato ka talo bixinta hiigsiga 2016ka, waxaan soo jeedinaynaa talooyinka hoos ku qoran:

1. In la abuurto Gole wada tashi Qaran oo soo diyaariya talo bixin ku saabsan qaabka iyo hannaanka looga gudbi karo marxaladda kala guurka ah ee hiigsiga 2016ka, waxayna ka koobnaan karaan xubno ka tirsan hay'adaha hoos ku qoran:
 - a. Golaha Shacabka FS
 - b. Xukuumadda FS
 - c. Maamullada KMG ah ee Dalka iyo kuwa dhismahoodu socdo
 - d. Bulshada Rayidka ah iyo Ururrada Siyaasadeed ee agaasiman
2. Maadaama Golaha Shacabku uu yahay hay'adda Sharci dejinta talooyinka kasoo baxo golaha wada tashiga Qaran waxaa talooyinkiisa ansixinaya Golaha Shacabka si sharciyad loogu helo Fulintooda
3. In Maamul goboleedyada KMG ah la waafajiyo Qodobka 49^{aad} ee Dastuurka si ay u helaan sharciyad ay kaga mid noqdaan dowladaha xubnaha ka noqon doono Dowladda Federaalka Soomaaliya.
4. Golaha Shacabka isagoo bogaadinaya kana mahad celinaaya taageerada beesha caalamka ay siiso Dowladda FS. Hadaba Goluhu wuxuu Beesha Caalamka ka codsanayaa inay taageeraan Go'aammada hay'adaha Dastuuriga ah ee dowladda, iyagoo ixtiraamaya Dowladnimada iyo Qarannimada ummadda Soomaaliyeed.

Xildhibaannada soo jeediyey talooyinkaan:

1. Xil. Nuur Faarax Jaamac
2. Xil. Sheikh Aadan Maxamed Nuur (Madoobe)
3. Xil. Fawziya Maxamed Sheikh
4. Xil. Cismaan Xaaji Cali
5. Xil. Saalim Caliyow Ibrow
6. Xil. Xabiibo Maxamed Khayr
7. Xil. Daahir Xaaji Geelle
8. Xil. Mahdi Cali Cusmaan
9. Xil. Cali Adan Xuseen
10. Xil. Maxamed Cabdullaahi Kaamil

11 - XIL. ABDULQADIR SHEIKH HANAFI^O

Wabillaahi Towfiq